



Sum: MS/XG/ 63/2025

Tr: 10.08.2025

Ku: Xubnaha Magacyadoodu hoos ku qoran yihiin

Og: Guddiga Doorashada Ururka Qareennada Soomaaliyeed

Og: Guddiga Fulinta Ururka Qareennada Soomaaliyeed

Og: Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka

=Muqdisho=

=Muqdisho=

=Muqdisho=

=Muqdisho=

Ujeedo: Magacaabid Guddiga Kor-joogtaynta Doorashada Ururka Qareennada

Guddoomiyaha Maxkamadda Sare:

**Markii uu arkay:** Muhiimadda uu ururka qareennadu u leeyahay maamulka hannaanka caddaaladeed ee dalka, tallinta iyo sarraynta sharciga

**Markii u tixgeliyey:** Muhiimadda ay leedahay qabashada doorashada Ururka oo u dhacda si hufan, daah-furan, xor iyo xalaal ah.

**Markii uu la tashaday:** Dhinacyada ay arrintani khusayso

Waxa uu soo saaray wareegtadan:

Qodobka 1<sup>aad</sup>:

Waxa uu xabnahan u magacaabay guddiga kor-joogtaynta doorashada Ururka Qareennada Soomaaliyeed:

| Lr. | Magaca oo Saddexan            | Hay'adda                                      | Xilka      |
|-----|-------------------------------|-----------------------------------------------|------------|
| 1.  | Saalax Sh. Ibraahim Dhiblaawe | Maxkamadda Sare ee Dalka                      | Guddoomiye |
| 2.  | Cabdulqaadir Maxamed Sheekh   | Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka | Xubin      |
| 3.  | Bashiir Maxamed Sheekh        | Jaamacadaha                                   | Xubin      |

Qodobka 2<sup>aad</sup>

Guddigu waxa ay qabanaysaa hawlahaan:

1. Kor-joogtaynta habsami u socodka hawlaha doorashada ururka qareennada;
2. Gacansiinta guddiga doorashada;
3. Xaqiijinta in hawlaha doorashadu si hufan u socdaan;
4. Ka talo-bixinta halwaha doorashada;



5. Xallinta wixii khilaafaad ah ee ka dhasha ururka dhexdiisa inta lagu guddo jiro diyaarinta hawlaha doorashada;
6. Xogsiinta Madaxda ay khusayso; iyo
7. Kala shaqaynta arrimaha xallinta u baahan ee ay ka mid yihiin wada shaqaynta iyo xidhiidhka ka dhexeeya Ururka Qareennada Soomaaliyeed iyo Qareennada Dawlad Goboleedyada.

**Qodobka 3<sup>aad</sup>**

Wareegtadani waxa ay dhaqangalaysaa marka uu Guddoomiyaha Maxkamadda Sare saxeexo.

Allaa Mahad Leh



**Mudane Baashe Yuusuf Axmed**  
**Guddoomiyaha Maxkamadda Sare JFS**